



Warbixin ku socota waalidka helay go'aanka codsigii magangelyada Somali

Warbixin ku saabsan oggolaanshaha

Inantaada oggolaansho ayaa laga siiyey Norway, waayo Hay'adda Arrimaha Ajnabigu (UDI) waxay qabtaa in ay halis ugu jirto in gudniin lagu sameeyo haddii waddanka hooyo lagu celiyo. Oggolaanshaha waxa loo bixiyey si inanta looga gaashaamo gudniin.

Adiga ayey ku saaran tahay mas'uuliyadda guud ee ah in aan inantaada la gudin. Haddii inantaada la gudo waxaad lumin kartaa oggolaashada joogitaanka Norway.

Oggolaashada joogitaan ee lagu siiyay waxay soconaysaa hal sano. Ka hor inta aan lagu cusboonaysiin, waa in aad timaaddaa UDI si aad noola yeelato wadahadal ku saabsan xaaladda inantaada.

Maxaa dhacaya haddii la gudo inan/gabadh deggan Norway?

Norway waa ka mamnuuc in la fuliyo ama laga qaybqaato gudniinka hablaha. Mamnuucu wuxu khuseeyaa dhammaan noocyada kala duwan ee gudniinka. Qofka Norway deggan waxa lagu ciqaabi karaa ilaa toban sanno oo xabsi ah haddii uu ka qaybqaato gudniin lagu fulinayo inan/gabadh. Waalidka waa la ciqaabi karaa haddii inantooda la gudo oo ay suuragal u ahayd in ay ka hortagaan gudniinka. Taasu way khuseysaa xitaa haddii gudniinka lagu fuliyo waddan kale.¹ Dadka lagu xukumo ciqaab noocaas ah waxa laga musaafurin karaa Noorwey.²

Yaa ilaalinaya in aan la gudin hablaha Norway jooga?

Shaqaalo badan oo u shaqeeya dawladda ama shirkaddaha gaarka ah ee Norway waxa ku waajib ah in ay wargeliyaan booliska ama adeegga maadinta carruurta haddii ay hayaan xog ku saabsan inan halis ugu jirto in la gudo. Waxa lagu ciqaabi karaa ganaax lacageed ama xabsi haddii ay soo sheegi waayaan.

Marka uu adeegga maadinta carruurta helo farriin ku saabsan in inan ay halis ugu jirto in la gudo, waxa uu u kuurgalayaa xaaladda daryeel ee ilmaha. Adeegga maadinta carruurta waxa uu amri karaa in ilmaha la geeyo cosbitaalka si loogu sameeyo baadhitaan caafimaad.

Waalidka ka yimi waddamada dumarka la gudo waxa ay fursad u helayaan in ay wadahadal la yeeshaan kaalkaalis caafimaad si ay uga hadlaan gudniinka. Gabdhaha dhigta dugsiga dhexe ee Norway waxa ay fursad u helayaan in ay wadahadal la yeeshaan kaalkaalis caafimaad si ay uga hadlaan gudniinka

Warbixin ku saabsan gargaar caafimaad

Hablo iyo dumar badan ayaa la guday intaanay iman Norway. Ma aha mamnuuc in qofku gudnaado, laakiin waalidka waxa ku waajib ah, in ay ilaaliyaan in hablahooda gudan ay helaan gargaarka caafimaad ee ay u baahan yihiin. Gobol-caafimaad kasta oo ku yaal Norway waxa uu leeyahay qayb haween oo mas'uuliyad gaar ah u leh in ay gargaar caafimaad siiso hablaha iyo dumarka gudan.

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah, waxa aad soo wici kartaa [lambarka-Laangayrta Cas ee guurka qasabka ah iyo gudniinka](tel:81555201) 815 55 201, waxa aad la hadli kartaa dhakhtar ama kaalkaalis caafimaad, ama waxa aad la xidhiidhi kartaa adeegga maadinta carruurta ee degmada aad deggan tahay. Warbixin kale oo ku saabsan gudniinka iyo fursadaha gargaarka caafimaad waxa aad ka helaysaa bogga internetka ee www.nkvt.no. Halkan waxa ka mid ah oo aad ka helaysaa warbixino kala duwan oo ku qoran afaf kala duwan.

1 Xeerka mamnuuca gudniinka hablaha § 1

2 Xeerka ajnabiga §§ 66 - 68

Informasjon om tillatelsen

Datteren din har fått beskyttelse i Norge, fordi UDI mener at hun står i fare for kjønnslemlestelse (kvinnelig omskjæring) ved retur til hjemlandet. Tillatelsen er gitt for å beskytte datteren din mot omskjæring.

Det er du som har hovedansvaret for at datteren din ikke blir omskåret. Dersom datteren din blir omskåret kan du miste oppholdstillatelsen din i Norge.

Oppholdstillatelsen din varer i ett år. Før du kan få fornyet den, må du komme til UDI for å ha en samtale med oss om situasjonen for datteren din.

Hva skjer hvis jenter som bor i Norge blir omskåret?

I Norge er det forbudt å utføre eller medvirke til kjønnslemlestelse (kvinnelig omskjæring). Forbudet gjelder alle former for kvinnelig omskjæring. Personer som bor i Norge kan bli straffet med inntil ti års fengsel, dersom de medvirker til at en jente blir omskåret. Foreldre kan bli straffet dersom datteren deres blir omskåret og det hadde vært mulig for dem å avverge omskjæringen. Det gjelder selv om omskjæringen skjer i et annet land.¹ Personer som får en slik straff kan bli utvist fra Norge.²

Hvem passer på at jenter i Norge ikke blir omskåret?

Mange offentlig og privat ansatte i Norge har plikt til å informere politiet eller barnevernstjenesten hvis de har opplysninger om at en jente kan stå i fare for å bli omskåret. De kan bli straffet med bøter eller fengsel, dersom de lar være å varsle.

Når barnevernstjenesten får melding om at en jente står i fare for kjønnslemlestelse, vil de undersøke barnets omsorgssituasjon. Barnevernstjenesten kan gi pålegg om at barnet bringes til sykehus for medisinsk undersøkelse.

Foreldre fra land med kvinnelig omskjæring, vil få tilbud om samtale med helsesøster for å snakke om omskjæring. Jenter som går på ungdomsskolen i Norge vil få tilbud om samtale med helsesøster for å snakke om omskjæring.

Informasjon om helsehjelp

Mange jenter og kvinner har blitt omskåret før de kom til Norge. Det er ikke forbudt å være omskåret, men foreldre har plikt til å påse at døtre som er omskåret får nødvendig helsehjelp. I hver helseregion i Norge finnes en kvinneklinikk som har et spesielt ansvar for å gi helsehjelp til jenter og kvinner som er omskåret.

Dersom du trenger mer informasjon, kan du ringe Røde Kors-telefonen om tvangsekteskap og kjønnslemlestelse 815 55 201, snakke med lege eller helsesøster, eller du kan kontakte barnevernstjenesten i kommunen der du bor. Du kan også finne informasjon om kjønnslemlestelse og tilbud om helsehjelp på nettsiden www.nkvts.no. Her finner du blant annet informasjonsbrosjyrer på ulike språk.

1 Lov om forbud mot kjønnslemlestelse § 1

2 Utlendingsloven §§ 66 - 68